Sharci lambar 7, taariikh 2 Feb. 1986: Dib u habeynta Mihnadda Notaayada

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA : Oggeiaantiitaha Golaha Shacbiga;

# WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

\*

4

w

#### Qod. 1aad

Mihnadda Notaayada waxaa lagu dhaqayaa Sharciga lambar 8 ee 15-2.1961 iyo Xeerka-tashriiciga lamb**ar** 1 ee 2-3.1962.

## Qod. 2aad

Iyagoo Sharciyada kor ku tilmaaman ay sidooda u taagnaanayaan, Madaxweynaha JDS, dhegeysiga soojeedinta Wasiirka Gasroorka iyo Arrimaha Diinta kaddib, wuxuu Notaayo u magacaabi karaa, imtixaan la'aan, qof xagga aqoonta gaarka ah ee mihnadda Notaayenimada, khibradda iyo waayo arganimada uu leeyahay dartood loo gartay inuu mudan yahay xilkaas in uu qabto.

### Qod. 3aad

1. Sharciyaqaannada ka tirsan Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta ee dhaqangalka Sharcigan ka hor hayey xil Notaayo, waxaa u furan in ay shaqada notaayenimada sii wataan iyagoo tan Dawladda istiqaalo ka keenaya ana ay ku laabtaan Wasaaraddooda

2. Kala doorashada labada fursadood waa in ay <sup>k</sup>u dhacdaa muddo lixdan maalmood gudahood ah, l**aga** billaabo maalinta Sharcigani uu dhaqan galo.

#### Qod. 4aad

Khidmadda Notaayubu uu ku yoolanayo hawlaha uu qabto waxaa lagu xaddidayaa Keer Madaxweyne, iyadoo la dhegeystay soojeedinta Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta

## Qod. 5aad

Waxaa la baabi'iyey Sharci iyo Xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la secon harin Sharcigan.

### Qod. 6aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Muqdisho, 2 Feb. 1986

2

MADAXWEYNAHA JDS (Maxamed Siyaad Barre)